

‘Kamiin ka dhacay duleedka Daaru-nicma ee Shebellaha Dhexe’

28 Rajab 1444H (19 Febraayo 2023) – Ciidamada Mujaahidiintu waxay saakay oo Axad ah kamiin u dhigeen ciidamo murtadiin ah oo ku socdaalayay duleedka deegaanka Daaru-nicma ee Wilaayada Shabeellaha Dhexe. Ciidankaan oo kamid ahaa murtadiintii dhawaan laga keenay wadanka Eritrea ayaa damacsanaa inay dhibaatooyin u geystaan dadka Muslimiinta ah ee ku dhaqan dhulka baadiyaha ah ku xeeran tuulada Daaru-nicma, balse waxaa dagaal kala hortegay ciidamada Mujaahidiinta oo la socday dhaqdhaqaaqooda.

Mujaahidiintu waxay -Allaah fadligiis- jab lixaad leh u geysteen ciidamadii murtadiinta ahaa, waxaana jira khasaare dhimasho iyo dhaawac oo cadawga soo gaaray. Sidoo kale waxaa jira hub iyo saanad ciidan oo laga qaniimaystay murtadiinta.

Tirada dhimashada ciidamadaas ridada ah, inta aan ilaa hada xaqiijinay, waa 29 askari, kuwaas oo 6 kamid ah, oo uu ku jiro taliyihii hogaaminayay ciidankaas, ay maydadkooda goobta uga carareen, Mujaahidiintuna gacanta ku dhigeen.

Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab waxay u dagaallameysa dhawritaanka badqabka Ummadda Muslimka ah, hirgelinta Shareecada Islaamka iyo inay dhamaan dhulalka Muslimiinta ah ka xoreyso gaalada iyo murtadiinta dabadhilifka u ah. Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab waxay mar kale ku celinaysaa dalabkii ahaa in dadka Muslimiinta ah ay ka dheeraadaan saldhigyada, xarumaha iyo xafiisyada cadawgu ku leeyihiin degmooyinka iyo deegaanada ay xoogga uga haystaan ummada Soomaaliyeed ee Muslimka ah.

Waxay Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab ballan ku qaaddeysaa inay sii wadi doonto Jihaadka ka dhanka ah isbahaysiga caalamiga ah ee saliibiyiinta iyo dabadhilifyadooda murtadiinta ah ilaa ay geyiga Soomaaliyeed ka saareyso cadowga hororka ah ee ku soo duuley, iyo illaa diinta dhamaanteed ay Allaah keliya u sugnaaneyso. Allaah, subxaanahu watacaalaa, wuxuu yiri:

﴿وَقَاتِلُوهُمْ حَتَّى لَا تَكُونَ فِتْنَةٌ وَيَكُونَ الدِّينُ لِلَّهِ فَإِنْ انْتَهَوْا فَلَا عُدْوَانَ إِلَّا عَلَى الظَّالِمِينَ [البقرة:193]



﴿وَلِلَّهِ الْعِزَّةُ وَلِرَسُولِهِ وَلِلْمُؤْمِنِينَ وَلَكِنَّ الْمُنَافِقِينَ لَا يَعْلَمُونَ﴾